# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-805/122011 DATE 13/12/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0180/122011

## Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha Xeer Lr. 37/2007 Lifaaqa 3aad

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/550/2011, ee Ansixinta Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha Xeer Lr. 37/2007 Lifaaqa 3aad;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

### Wuxuu Soo Saaray;

Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaasha ee Xeer Lr. 37/2007 lifaaqa 3aad oo ah:

1. Diiwan gelinta hore ee 2008kii laga qabtay dalka JSLwaa la laalay.
2. Doorashooyinka soo socda ee Golayaasha Deegaanka oo kaliya ayaa lagu galayaa diiwaan gelin la'aan.
3. Ka hor Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Madaxtooyada waa in Dalka JSL lagu qabtaa diiwaangelin cusub. Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Madaxtooyada lagu galaa.
4. Waxa la laalay Qodobka ku cad Xeerka Doorashooyinka Xeer Lr. 20/2001, wax ka Bedelka (Kuna suntan qodob cusub).
5. Waxa halkan lagu laalay qodob kasta oo ka hor imanaya faqradahan lifaaqan ee (1, 2, 3, 4).

Allaa Mahad Leh.

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland